## Waa wax aad u wanaagsan in dhallintaadu ay xiisaynayso barnaamijka madadaalada ee Flyt!

Flyt waa barnaamij madadaalo oo ay dhallinyaradu ku biiraan koox maxalli ah oo ay la wadaagaan dhallinyaro kale oo ka tirsan Flyt. Waxay ka qaybqaataan hawlo madadaalo leh, waxay samaystaan saaxiibo cusub, waxayna bartaan xirfado waxtar leh. Ujeeddadu waa in loo fududeeyo u gudubka dugsiga sare. Laga soo bilaabo 2019, in ka badan 2,500 oo dhallinyaro ah ayaa ka qaybqaatay. Qiimaynnadu waxay cadaynayaan in ka qaybgalayaashu ay samaystaan saaxiibo cusub, wax badan bartaan, isla markaana ay dareemaan kalsooni dheeraad ah oo ku aaddan mustaqbalka.

Flyt wuxuu bilaabaa kulan maalmaha sabtida iyo axadda oo la qabanayo dayrta 2026. Taas waxaa ku xigta 10 toddobaad oo kulammo ah, kuwaas oo toddobaadkiiba hal galab la qabto. Flyt wuxuu ku soo gabagaboobayaa kulan maalmaha sabtida iyo axada ah oo la qabanayo bisha Janaayo. Habeen meesha la seexanayo ma jirto, wax walbana waxay dhacayaan saacadaha ka baxsan waqtiga dugsiga.

Flyt waxaa horumariyey hay'adda samafalka ee Crown Prince and Crown Princess's Fund ee Norway, waxaana lagu maamulaa iyadoo lala kaashanayo maamulka deegaanka, degmooyinka magaalooyinka iyo ururrada.

Dadka doonaya inay ku biiraan Flyt ayaa ka badan tirada boosaska la heli karo. Sidaas darteed, ka qaybgalayaasha waxaa lagu doortaa si aan kala sooc lahayn. Si loogu daro bakhtiyaanasiibka lagu heli karo booska Flyt, dhallinyaradu waa inay marka hore iska diiwaangeliyaan mashruuca cilmi-baarista ee GameChanger. Cilmi-baarayaashu waxay baari doonaan sida barnaamijka Flyt u saameeyo waxbarashada, fayo-qabka iyo rajada dhallinyaradu ka qabaan shaqada qofku qabsado inta uu nool yahay. Si tan loo xaqiijiyo, waxaan u baahanahay kaalmada ka-qaybgalayaasha, waxaana rajaynaynaa in dhallintaadu ay ka qaybqaadato.

Si aad ilmahaaga ugu diiwaangeliso cilmi-baarista, fadlan isticmaal linkigan:
https://nettskjema.no/a/flytsamtykke2026

Markaad saxiixdo, waxaad oggolaanaysaa qodobada soo socda:

- Cilmi-baarayaashu waxay adeegsan doonaan xogta tirakoobka ee horey looga ururiyey dhallinyarada oo ay hayaan hay'adaha dawliga ah. Waxaan soo ururin doonaa macluumaad ku saabsan dawlada hoose ee ay ku nool yihiin, dhibcaha iyo xaadiritaanka dugsigooda, haddii ay dhammaysteen waxbarashada dugsiga sare, iyo dakhligooda.
- Dhallinyarada waxaa lagu martiqaadi doonaa inay buuxiyaan 2–3 su'aalood oo gaagaaban inta uu socdo mashruuca cilmi-baarista. Waxaan weydiin doonaa sida ay xaaladdoodu tahay, wax ku saabsan dugsiga, waqtigooda firaaqada iyo noloshooda.
- Waxaan heli doonaa magacyada dhallinyarada, lambarradooda taleefanka iyo lambarrada aqoonsigooda qaran. Waxa kale oo qasab ah in magaca iyo cinwaanka

iimaylka ugu yaraan hal waalid ama masuul lagu diiwaangeliyo foomka oggolaanshaha.

Dhammaan macluumaadkan si ammaan ah ayaa loo kaydin doonaa, waxaana la tirtiri doonaa sannadka 2034 ka dib. Qof kasta oo akhriya natiijooyinka cilmi-baarista ma awoodi doono inuu aqoonsado dhallinyarada.

Waxaad ilmahaaga kala bixi kartaa cilmi-baarista wakhti kasta haddii aad go’aansato inaad maskaxdaada beddesho.

**Asturnaanta iyo xuquuqda**

Machadyada cilmi-baarista ee NOVA (OsloMet), Xarunta Frisch iyo NORCE ayaa mas’uul ka ah arrintan. Waxaa naloo oggol yahay inaan ururinno macluumaadkan, maadaama ujeeddadu tahay cilmi-baaris dan guud. Macluumaadkan waxaa loo isticmaali doonaa oo keliya cilmi-baarista waana la tirtiri doonaa marka la dhaafo 2034.

Adiga/dhallintu waxaad xaq u leedihiin:

- inaad heshaan macluumaadka ku saabsan qofka dhalinta ah
- inaad codsato sixida ama tirtirida
- inaad ka hor imaato ka shaqaynta

Waxaad sidoo kale cabasho u gudbin kartaa Hay'adda Ilaalinta Xogta haddii aad aaminsan tahay in xogtaada aan si sax ah looga shaqaynin.

**Qofka lala xiriirayo**

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama aad rabto inaad ka laabato, fadlan la xiriir:

- NOVA (OsloMet): Mira Sletten – mira.sletten@oslomet.no – 402 26 973
- Xarunta Frisch: Nina Drange – nina.drange@frisch.uio.no – 414 57 945
- Xafiiska Ilaalinta Xogta – personvernombud@oslomet.no / sverre.kittelsen@frisch.uio.no

**Halkan ka akhriso xog badan oo ku saabsan mashruuca:**
https://www.oslomet.no/forskning/forskningsprosjekter/tiltak-fullfore-vgs/info-flyt